# Soo Xulidda Xildhibaannada Baarlamaanka Soomaaliya

## Aragtida Shacabka




December 2015

Waxaa faafiyay Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2015, Muqdisho, Soomaaliya

## Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Bogga hore: Sawir Soomaali siyaasad ka shiraysa

Xuquuqda sawirka © Machadka Heritage ee Daraasaadka

Xuquuqda: Xuquuqda daabacaadda © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash looma isticmaali karo. www.creativecommons.org/licences/ by/nc-nd/3.0.

Kala soo bax qoraalka bogga: www.heritageinstitute.org

## Tusmo


Nuxurka Qoraalka ........ 1

Raad-raac ........ 2

Habka daraasadda loo sameeyay ........ 4

Waxyaabaha xaddiday cilmibaarista ........ 5

Natiijooyinka Cilmibaarista iyo Falanqeyn ........ 6

Suurtagal la'aanta Doorashooyin Dimuqraadi ah ........ 6

Caqabadaha doorashooyinka 2016 ........ 7

Kala duwanaanshaha xaaladda anmi ee Gobollada ........ 8

Qaababka iyo aragtiyada kala duwan ee xildhibaano loo xuli karo ........ 9

Farqiga Gobollada ........ 10

Muddo Kordhin ........ 12

4.5 & Soo xulidda Xildhibaannada ........ 14

Waxqabadka Dowladda ........ 15

Waxyaabaha sababay waxqabadka hooseeya ........ 17

Doorka beesha caalamka ........ 19

Gunaanad ........ 20

Talooyin Tixgelin Mudan ........ 21

## Nuxurka Qoraalka

- Tiro aad u badan (79 boqolkiiba) oo kamid ah dadkii xog uruurinta laga sameeyay waxa ay ku waafaqeen dowladda in doorasho qof iyo cod ah aanay ka dhici karin Soomaaliya 2016. In ka badan 43 boqolkiiba waxa ay u sababeeyeen amni xummo in ay tahay caqabadda ugu weyn, iyada oo 18 boqolkiiba ay ku eedeeyeen hoggaanka siyaasadeed in aanu doorasho daneyneyn; 18 boqolkiiba ayaa sidoo kale sheegay shuruucdii iyo kaabayaashii doorashooyinka oo aan diyaar ahayn in ay tahay caqabad weyn.

- Maaddaama doorasho xor ah aanay dhaceynin, in ka badan kala bar (51 boqolkiiba) waxa ay sheegeen in odayaasha dhaqanka ama in waxgaradka beel kasta (clan constituency assembly) ay yihiin habka xulidda oo ay door bidayaan. In ka badan 27 boqolkiiba oo dadkaasi kamid ah ayaa ku jawaabay in ay doonayaan in odayaasha dhaqanku ay soo xulaan xildhibaannada sidii ay usoo xuleen 2012, halka ku dhawaad afar meelood meel ay doorbidayaan in waxgaradka beeluhu ay soo xulaan xildhibaannada.

- Dhanka kale, hab xulid ku saleysan gobollada/maamul goboleedyada ama degmooyinka ayaa sidoo kale ahaa hannaan ay doorbidayeen qaar badan oo ka mid ah dadkii xog uruurinta laga sameeyay. 41 boqolkiiba ayaa door bidday degmooyin ama maamul goboleedyada/gobollada in lagu saleeyo metalaadda intii qabiil lagu saleyn lahaa. Ku dhawaad afar meelood meel (22 boqolkiiba) waxa ay sheegeen in ay doonayaan in degmooyinka lagu saleeyo soo xulidda xildhibaannada, halka (19 boqolkiiba) ay doorteen in soo xulista xildhibaannada lagu saleeyo maamul goboleedyada

- 64 boqolkiiba dadkii xog uruurinta laga sameeyay waxa ay sheegeen in ay kasoo horjeedaan habka awood qeybsiga ee 4.5. Halka 32 boqolkiiba ay sheegeen in ay ku qanacsan yihiin awood qeybsiga qabiilka, iyadoo tiro aad u badan (71 boqolkiiba) ee dadka Baydhabo ee xog uruurintan ka qeyb galay ay tilmaameen in ay taageersan yihiin hannaanka 4.5.

- Tiro aad u badan (60 boqolkiiba) ayaa diiday in muddo kordhin loo sameeyo Xildhibaannada Federaalka iyo Dowladda, taasi oo muujineysa ku qanacsanaan la’aanta baahsan ee waxqabadka dowladda. 37 boqolkiiba dadkii la waraystay ayaa sheegay in waxqabadka dowladda uu yahay mid daciif ah halka in ku dhaw afar meelood meel ay ku sheegeen in ay dowladdu fashilantay.

- 52 boqolkiiba dadka xog uruurintan laga sameeyay waxa ay sheegeen in musuqmaasuqa uu yahay arrinka ugu weyn ee hoos u dhigay waxqabadka dowladda, halka 22 boqolkiiba ay sababta ku tilmaameen karti la’aan.

- Ku qanacsanaan la’aanta sidoo kale waxa ay ka jirtay dhanka beesha caalamka, iyada oo in ka badan 66 boqolkiiba dadka xog uruurintan laga sameeyay ay sheegeen in ay

dhaliilayaan sida ay beesha caalamku ugu dhex jirto arrimaha Soomaaliya. 40 boqolkiiba oo kamid ah dadkaas waxa ay sheegeen in ay rumeysan yihiin in beesha caalamku ay qabatay wax aad u yar si Soomaaliya doorasho uga dhacdo sanadka 2016. Kuwa aad u dhaliilsanaa beesha caalamka, 26 boqolkiiba waxa ay tilmaameen in ay rumeysan yihiin in beesha caalamku ay ku guul daraysatay Soomaaliya. Iyada oo ay taasi jirto ayaa tiro aad u badan, 73 boqolkiba dadka la waraystay waxa ay sheegeen in beesha caalamku ay saameyn aad u weyn ku leedahay jiheynta Soomaaliya ee mustaqbalka.

## Raad-raac

Sanadkii 2013, Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxa ay qortay qorshe dhameystiran oo loogu magac daray Hiigsida 2016 kaasoo hadafkiisu ahaa in uu jiheeyo dowladda ilaa laga gaarayo muddada xilkeeda uu ku egyahay. Hiigsiga waxa uu ku salaysnaa saddex tiir: in dalka loo diyaariyo doorasho xor ah oo xalaal ah; in la dhammaystiro qabya qoraalka dastuurka; iyo in la dhammaystiro dhaqan gelinta federaalka iyada oo la sameynayo dowladaha xubnaha ka noqonaya Dowladda Federaalka ah.

Iyada oo seddexdaas hadaf ay ahaayeen kuwo aad u waaweyn oo culayskooda leh, haddana in la diyaariyo doorashooyin bisha Sebtember 2016 waxa ay u muuqatay mid adag marka la fiiryo amni xummada, shuruucdii doorashooyinka oo aan diyaar ahayn, iyo diyaar garowga dowladda oo liitay. Si kastaba arintu ha ahaatee, suurtagal la'aanta in aanay doorasho dhici karin waxa ay caddaatay marka ay Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ay si rasmi ah 28-kii bishii July u shaacisay in doorasho qof iyo cod ah aanay dhici doonin sanadka 2016 sababo badan oo is biirsaday awgood. Iyada weliba aan hannaan doorasho lagu heshiin, shuruuc aad u muhiim ah sida sharciga xisbiyada siyaasadda ay weli qabyo yihiin.

Sanadkii 2012, odayaal dhaqameed ka kooban 135 ayaa loo xilsaaray in ay xildhibaannada baarlamaanka kasoo xulaan qabaa'ilkooda una gudbiyaan guddigii farsamada. Inkastoo wax isdaba marin meelo badan ka jirtay, haddana hannaankaas waxa uu ahaa mid guul ah marka loo eego duruufihii lagu jiray xilligaas seddex sabab awgood. Kow, howsha oo dhan waxa lagu qabtay caasimadda dalka ee Muqdisho – waxayna ahayd markii ugu horeysay ee dowlad qaran lagu yegleelo gudaha dalka tan iyo sanadkii 1991. Labo, nidaamka waxa hoggaaminayay Soomaali. Midda seddexaad uguna muhiimsan, natiijadii kasoo baxday (275 xildhibaan) waa la wada aqbalay loona arkay masuuliyiin meteli kara dadka Soomaaliyeed.

Iyadoo taasi ay jirto, ayuu haddana hannaankaasi ahaa mid khaladaad badan leh. Musuqmaasuqa aad ayuu u badnaa, lacago tira badanna waa la bixiyay si loo helo kuraasta xildhibaannimada baarlamaanka federaalka ah. Sidoo kale howsha oo dhan waxa hoggaaminayay dad dabaqadda sare ah taas oo ka joojisay inta badan dadka Soomaaliyeed in ay ka qeybqaataan. Tirada yar ee odayaasha dhaqanka ah ee ay ku koobnayd soo xulidda 135 xildhibaan waa mid muujinaysay in howsha xulista xildhibaannada aanay u dhammeyn dadka oo dhan.

Iyada oo waqtiga dowladda federaalka ah ee hadda jirta uu galay sannadkii ugu danbeeyay, islamarkaana la sheegay in doorasho qof iyo cod ah aanay suuragal ahayn, siyaasiyiinta dalka oo dhan waxa ay billaabeen wadahadal iyo doodo ku aaddan siyaabaha loo soo xuli karo xildhibaannada 2016. Hoggaanka siyaasadeed ee heerka qaran iyo heerka gobolba waxa ay dhawaan sameeyeen Madasha Wadatashiga Qaran ee arrimaha doorashooyinka 2016 iyaga oo taageero ka helaya beesha caalamka. Madasha waxa ay soo jeedisay afar hab ee lagu soo xuli karo xildhibaannada 2016: hannaan dalka oo dhan ah xulid xildhibaanno laga samaynayo, hannaan heer maamul gobol xulista laga samaynayo, hannaan heer degmo ay xulustu ku salaysan tahay iyo hannaan ku saleysan qabiil[1]. Madasha waxa ay soo gaba gabeysay wadatashiyo dhowr ah ee lagu qabtay Muqdisho, Kismaayo, Baydhabo, Cadaado iyo Garowe. Natiijada wadatashigan waxa loo muddeeyay in lasoo bandhigo dabayaaqada sanadkan ama bilowga sanadka danbe ee 2016.

Machadka Heritage waxa uu bilaabay cilmibaaristan si uu dood ugu biiriyo hababka kala duwan ee si nabad ah awoodda loogu wareejin karo sanadaka 2016 isaga oo isticmaalaya xog si cilmiyeysan loo soo uruuriyay iyo taxliil. Mashruuca waxa uu hadafkiisu yahay in uu soo bandhigo codka dadka Soomaaliyeed ee ku aaddan 2016 islamarkaana uu soo gudbiyo xog muhiim ah ee la xariirta kala duwanaanshaha fikirka ummadda Soomaaliyeed. Natiijada cilmibaaristan waxa ay soo bandhigaysaa xog lagu kalsoonaan karo, metelina karta dadka deggan shan magaalo ee ka mid ah magaalooyinka ugu dadka badan Soomaaliya, si ay cilmi-baaristu wax ugu biiriso geeddi-socodka siyaasadda Soomaaliya.

[1] Madasha Wadatashiga Qaran ee arrimaha doorashooyinka 2016. http://www.villasomalia.gov.so/wp-content/uploads/2015/10/Facilitation-Guide.pdf

## Habka daraasadda loo sameeyay

Cilmibaaristan waxa laga sameeyay shan magaalo oo juqraafi ahaan kala duwan, siyaasad ahaanna muhiim ah kuwaas oo kala ah: Garoowe, Gaalkacyo (koonfur), Muqdisho, Baydhabo iyo Kismaayo. Magaalo kasta waxa ay meteshaa maamul goboleed. Waxaan tuhunsanayn in aragtida dadka cilmibaaristan ka qeybqaatay ama la waraystay ee magaalo kasta in ay ka turjumeyso aragtida siyaasadeed ee baahsan ee hoggaanka heerka maamul goboleed kuwaas oo isku daya in ay jiheeyaan aragtida muwaadiniinta.

Mashruuca waxa uu isticmaalay aragti uruurin/sahan (survey) si uu xogta dadka usoo uruuriyo. Machadka cilmibaaristan waxa uu kala kaashaday afar jaamacadood ee kala ah Jaamacadda Puntland State Univeristy ee ku taalla Garoowe, Jaamacadda Gaalkacyo, Jaamacadda Koonfurta Soomaaliya ee ku taalla Baydhabo iyo Jaamacadda Kismaayo. Jaamacad kasta waxa ay cilmibaarista ka fududeysay magaalada ay ka howlgasho. Jaamacad kasta waxa ay sidoo kale soo xushay lix qof (seddex lab iyo seddex haween ah) oo ka qalin jebiyay ama dhigta jaamacadda kuwaas oo la siiyay tababar ku aaddan sida ay xog uruurinta u sameynayaan. Sagaal iyo toban su'aal ee uu diyaariyay machadka ayaa la weydiiyay dad gaaraya 1,287 dadkaas oo ku kala nool shantaas magaalo. Dad Soomaali iyo ajaanib isugu jira ayaa sidoo kale ka tala bixiyay su'aalaha, habka cilmibaarista loo sameynayo iyo taxliilkaba.

Xog uruurintan waxa la sameeyay inta u dhexeysay 14-kii October iyo 17-kii November 2015. 1287-da qof ee xog uruurintan ka qeyb qaadatay, 360 waxa ay degen yihiin Muqdisho, 227 waxaay ku nool yihiin Garoowe, 231 waxa ay ku sugnaayeen koonfurta Gaalkacyo, 237 waxa ay ku noolaayeen Baydhabo iyadoo 232 ay ku sugnaayeen Kismaayo. 56 boqolkiba waxa ay ahaayeen lab, halka 44 boqolkiiba ay dumar ahaayeen. Inta ugu badan dadka aan wareysannay (76 boqolkiiba) waxa ay ka yaraayeen 45 sano. Tiro badan oo dadkaas kamid ah (41 boqolkiiba) waxa ay da'dooda u dhexeysay 18 – 30 sano, halka 36 boqolkiiba ay da'dooda u dhexeysay 31 – 45. 1Boqolkiiba 18 waxa ay da'dooda ahayd 46-60 sano, iyadoo in ku dhow 5 boqolkiiba ay ka weynaayeen 61 sano. Xogtan waxa ay muujineysaa in dhalinyarada ay hihiin tirada ugu badan Soomaalida, marka la eego sahan tirakoob dhawaan la baahiyay[2].

Marka la fiiriyo aqoon ahaan, 30 boqolkiiba waxa ay heysteen shahaado dugsi sare, halka 27 boqolkiiba ay jaamacado dhigteen. In ku dhaw afar melood hal meel, 23 boqolkiiba, waxbarasho nidaami ah masoo marin, halka 20 boqolkiiba ay dugsi hoose dhigteen. Dadka aragtida laga soo uruuriyay, 30 boqolkiiba, shaqo la'aan ayay ahaayeen, iyadoo 20 boqolkiiba ay sheegeen in ay iskuul dhiganayeen. Inta soo hartay, 23 boqolkiiba, waxa ay ka shaqeynayeen hay'ado gaar loo leeyahay iyo kuwa dowladda.

Qaybta dadka ee waraysiga lala yeeshay (sampling) waxa lagu saleeyay habka degmooyinku u qaybsan yihiin (waax, xaafad ama degmo) ee magaalo kasta. Hadba iyada oo la eegayo baaxadda magaalada, ayaa magaalo kasta waxa loo qeybiyay inta u dhexeysa afar ilaa siddeed

[2] Eeg "Population Estimate Survey" by the Ministry of Planning & International Cooperation – May 2015

waax/xaafadood. Muqdisho waa ay ka duwaneyd afarta magaalo ee kale. Waxa ay leedahay 17 degmo, degmo kastana waxa ay leedahay afar waax. Suurto gal nooma noqan in aan cilmibaaristan ka sameyno dhammaan waaxyaha degmo kasta, laakiin waxa aan si nasiib ah (random) degmo kasta uga doorannay hal waax, isu geyn 17 waax ah. Waax kasta waxa ay fursad siman u heysatay in ay noqoto waaxda cilmibaarista laga sameynayo. Dareenka amni ee jira awgeed, si aan u xaqiijinno badqabka cilmibaarayaasha, waaxyaha amni ahaan la tagi karo ayaan ka doorannay degmooyinka Heliwaa iyo Dayniile.

Heritage waxa ay siisay cilmibaarayaasha tababar hal maalin ah, kaasi oo ka koobnaa habka cilmibaarista (research methodology), qaabka dadka la waraysanayo loo xulo ama (sampling) loo sameynayo, iyo sida loo isticmaalo mobile marka xog lasoo uruurinayo. Dhammaan cilmibaarayaasha waxa la weydiiyay in ay tiro siman ka wareystaan ragga iyo dumarka, inkasta oo xogta ay muujineyso in labka uu wax yar ka badan yahay dhedigga. Magaalooyinka Garoowe, Gaalkacyo, Baydhabo, iyo Kismaayo cilmibaare kasta maalintiiba waxa uu wareystay 20 qof muddo laba maalin ah. Magaalada Muqdisho cilmibaarayaashu waxa ay shaqeeyeen seddex maalin. Si loo xaqiijiyo in dadku nisiib u wada lahaayeen in la waraysto, cilmibaare kasta waxa uu wareysanayay hal qof kadib 10-kii guri dhammaan magaalooyinka oo dhan marka laga reebo Gaalkacyo halkaas oo la wareystay qof kadib 5 guri.

## Waxyaabaha xaddiday cilmibaarista

Waxa jira waxyaabo badan oo xaddiday cilmibaaristan:

- Ammaanka waxa uu ahaa caqabad dhammaan magaalooyinka aan booqannay guud ahaan. Tusaale ahaan ma aanan awoodin in aan si nasiib ah (random) u dooranno waaxyaha laba degmo ee Muqdisho ka tirsan. Sidoo kale ma aanan awoodin in aan u safarno Beledweyne – magaaladii lixaad ee aan horey u qorsheynay in aan cilmibaaristan ka sameyno – sababo ammaan iyo kuwa kale awgeed.

- Kaliya shan magaalo ayaa fikrado kasoo uruurinnay. Taasi oo ah in aan ka tagnay qeybo aad u badan ee waddanka ah oo fikradihii muwaadiniinta ku nool aanay ku jirin cilmibaaristan. Sidaas darteed, iskastoo natiijada cilmibaaristan ay tusineyso aragtiyada guud iyo fikirka dadka ku nool magaalooyinka aan cilmi-baarista ka samaynay, haddana natiijada laguma caam yeeli karo dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed. Si kastaba, natiijada cilmibaaristan waxa ay dadka go'aammada siyaasadda jaangooya usoo gudbineysaa xog muhiim ah ee cabbireysa fikradaha muwaadiniinta ku nool magaalooyinkanka waaweyn ee dalka iyada oo sidoo kale muujineyso aragtida guud ee laga qabo hababka xulasho ee sanadka 2016.

- Taleefonka gacanta oo casri ah ayaa loo isticmaalay xog uruurinta. Inkasta oo aan tababarnay cilmibaarayaasha islamarkaana siinnay wax kasta oo ay u baahnaayeen si ay xogta usoo uruuriyaan, tiknolajiyadaas casriga ah qaarkood waa ay ku cusbeyd. Sidaas darteed, su'aalaha qaar lagama jawaabin (ama dadka la weydiiyay ayaa diiday, ama cilmibaarayaasha ayaan weydiinin ama aan xogta diiwaan gelin). Tani waxa ay ka dhigtay tirada guud ee dadka aan waraysannay 1,287 iyada oo hadafkeennu ahaa 1,340.

- Qaar ka mid ah dadka aan wareysannay, su'aalaha ayaa ku adkaa sabab la xariirta wacyigooda ku aaddan dimoqraadiyeynta iyo doorashooyinka oo liitay. Si kastaba ha ahaatee, in kabadan kala bar (57 boqolkiiba) oo kamid ah dadka aan xog uruurinta ka sameynay waxa ay ku jawaabeen in ay aad u xiiseeyaan (29 boqolkiiba) ama ay xiiseeyaan (28) siyaasadda.


- Inta badan magaalooyinka Soomaaliya waxa ku badan hal qabiil ama qabaa'illo isku dhaw, waxaana aad u suuragal ah in xog uruurintan aanay soo gudbin aragtida qaar kamid ah dadka laga tirada badan yahay oo mararka qaar loogu yeero beesha shanaad maadaama qabaa'ilkan ay ku kala firirsan yihiin dalka oo dhan.

- Ma aanan awoodin in aan cilmibaaristan ka sameyno Somaliland sababo la xariira siyaasad iyo kuwa dhaqaale awgood. Somaliland waxa ay ku dhawaaqday in ay tahay jamhuuriyad madaxbannaan, taasoo Soomaalida inteeda kale iyo beesha caalamkuba aanay ku waafaqsaneyn.

## Natiijooyinka Cilmibaarista iyo Falanqeyn

### Suurtagal la'aanta Doorashooyin Dimuqraadi ah


Tiro aqlabiyad ah ama aad u ballaaran ee dadka xog ruurinta laga sameeyey (79 boqolkiiba) waxa ay ku waafaqeen dowladda in doorasho qof iyo cod ah aanay suuragal ahayn in ay ka dhacyo Soomaaliya sanadka 2016. Dadka cilmibaarista ka qayb-qaatay waxay tilmaameen in diyaar garowga liita ee dowladda awgeed, aanay doorasho xalaal ah aanay suurtagala ahayn sanadka 2016. Boqolkiiba 21 oo kaliya ayaa sheegay in doorasho sax ah ay suuragal tahay.




## Caqabadaha doorashooyinka 2016

Marka ay ku dhawaaqday in doorasho qof iyo cod ah aanay suuragal ahayn sanadka 2016, Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxa ay ku sababaysay 'arrimo badan oo is biirsaday awgood' in ay aysan doorasho u dhici karin. Dad badan waxa ay u badinayaan amni xummida dalka in ay tahay midda ugu weyn sababahaas iyada oo ay soo raacayaan diyaar garow ku filan oo aanay dowladda sameynin. Inkastoo magalooyin badan laga saaray gacan ku heynta Al shabaab, kooxdan waxa ay sii waddaa in ay weerarro qaaddo. Tan iyo Janaayo 2015, inta badan hoteellada waaweyn ee Muqdisho waxa ay bar tilmaameed u ahaayeen weerarro ismiidaamin ah, kuwaas oo lagu dilay dad tira badan oo ay ku jiraan shaqsiyaad caan ah. Al shabaab waxa ay sidoo kale kordhiyeen weerarrada ay ka fuliyaan Shabeellada Hoose iyo gobollo kale.

Xaaladda amni ee sii xumaaneysay ayay sheegeen dadka xog uruurinta aan ka sameynay in ay tahay caqabadda koowaad. Ku dhawaad kala bar (43 boqolkiiba) ayaa ku jawaabeen amni xummada in ay tahay caqabadda ugu weyn ee hortaagan in doorasho dimoqraadi ah la qabto. Taasi ma ahayn mid layaab leh, laakiin midda layaabka leh waxa ay ahayd in kabadan 18 boqolkiiba ayaa ku eedeeyay siyaasiyiinka hoggaanka heysa in aanay doorasho dooneynin. Tan iyo bishii July marka ay dowladda si cad u shaacisay in aanay doorasho dhici karin, siyaasiyiin caan ah ee katirsan Baarlamaanka Federaalka ah ayaa ku doodayay in muddada loo kordhiyo. Madasha High-Level Partnership Forum ee lagu qabtay Muqdishu 29-30-kii July, waxa la ogaa in tirada ugu badan ee 25-ka xildhibaan ee ka qeyb gashay ay ahaayeen kuwo taageersan muddo kordhinta.




## Kala duwanaanshaha xaaladda amni ee Gobollada


Dareenka amni xummo ee shanta magaalo ee aan xog uruurinta ka sameynay way kala duwanaayeen sida ay u kala duwanyihiin xaaladahooda amni iyo habka uu u soo dhismay maamulkoodu. Inta badan dadka deggan meelaha sanadihii lasoo dhaafay ay ka jireen qalalaasaha ayaa ahaa kuwa ugu badan ee arkayey dareenka amni darada. Aragtiyada amniga ee magaalooyinka colaadaha ay sababeen arrimo siyaasadeed sida Gaalkacyo iyo magaalooyinka kale oo amni xummida ka dhaxlay ficillo argixisannimo sida Baydhabo ayaa ahaa kuwo qaba dareen amni oo isku mid ah. Tirada ugu badan iskuna midka ah ee magaalooyinka Gaalkacyo iyo Baydhabo (48 boqolkiiba) ayaa dadka aan xog uruurinta ka sameynay waxa ay sheegeen in amni xummida ay tahay caqabadda ugu weyn in doorasho la qabto; sidaas si lamid ah Muqdisho (47 boqolkiiba) iyo Kismaayo (44 boqolkiiba) ayaa iyaguna tilmaamay in amni xummidu ay tahay caqabadda ugu weyn ee hortaagan in doorasho dimoqraadi ah la qabto.

Colaadda iyo dagaallada ka bilowday Gaalkacyo ee u dhexeeyay Puntland iyo Galmudug ee dhacay dhammaadkii bishii November kaa oo ay ka dhasheen dhimasho, dhaawac iyo barakac waxa uu muujinayaa walwalka dadka Gaalkacyo ay ka qabaan arrimmaha amniga in uu yahay mid taagan. Sidoo kale la yaab ma lahan in dadka deggan Muqdisho ay u arkaan amni xummida caqabad aad u weyn. Waayo, inkasta oo Dowladda Federalaka ah ee Soomaaliya ay si buuxda u maamuleysay caasimadda tan iyo sanadkii 2011, haddana dilal qorsheysan iyo weerarro argigixiso oo ay ka dhashaan khasaaro dhimasho oo aad u badan ayaa si joogto ah uga dhacayey Muqdisho seddexdii sano ee lasoo dhaafay.


Amni daradu ma ahayn dareen weyn oo ay qabeen dadka deggan Garoowe, caasimadda maamul goboleedka Puntland. Kaliya dad gaaraya 27 boqolkiiba ee ka mid ah dadka xog uruurinta laga sameeyay ayaa sheegay in amni xummidu ay tahay caqabad hor taagan doorashooyin toos ah. Puntland waxa ay ahayd maamul shaqeynaya tan iyo sanadkii 1998 magaala madaxda Garoowe waxa ay sidoo kale ahayd mid ka amni fiican afarta magaalo ee kale. 30 boqolkiiba, dadka Garoowe, shuruucdii iyo kaabayaashii doorashooyinka oo aanan diyaar ahayn ayay u arkayeen caqabadda ugu weyn ee hortaagan doorsho qof iyo cod ah. Tani waxa sidoo kale loo fasiri karaa in wacyigooda siyaasadeed uu yahay mid sareeya ama in ay yihiin kuwa u dhaw dareenka maamulka Puntland.

## Qaababka iyo aragtiyada kala duwan ee xildhibaano loo xuli karo

Inkasta oo dadka aan daraasadda ka samaynay ay aad u diiddanaayeen hannaanka awood qeybsi ee qabiilka ku saleysan, haddana hoggaanka dhaqanka ayaa u muuqda in uu yahay kan heysta qanaacada ugu badan, kol haddii aysan dhacayn doorasho, oo xulid ay hawshu ku soo urursay. Inta badan dadkii xog uruurinta laga sameeyay, 51 boqolkiiba waxa ay doorbideen in hoggaanka dhaqanka ama waxgaradka beel kasta (clan constituency assembly) ay soo xulaan xildhibaannada. Si gaar ah 27 boqolkiiba waxa ay caddeeyeen in ay arkaan in odayaasha dhaqanka ay soo xulaan xildhibaannada, halka 24 boqolkiiba ay taageereen in waxgaradka beel kasta uu soo xulo xildhibaannada. Ku dhawaad afar meelood meel (22 boqolkiiba) waxa ay door bideen metelaad ku saleysan degmooyin, halka qeyb kale oo gaareysa 19 boqolkiiba ay taageereen in maamul goboleedyadu ay soo xulaan xildhibaannada. Kaliya 5 boqolkiiba ayaa doorbiday muddo kordhin loo sameeyo xildhibaannada hadda jira.



Kuwa doonayey in odayaasha dhaqanku ay soo xulaan xildhibaannada, ku dhawaad kala bar (49 boqolkiiba) waxa ay rumeysnaayeen in hannaankan uu soo saari doono baarlamaan loo dhan yahay. Qaabka la isku matalayo waxa ay ahayd arrinta ugu muhiimsan siyaasadda Soomaaliya waana sababta ugu weyn ee ka danbeysay hannaanka awood qeybsiga 4.5. Ku dhawaad afar meelood meel (22 boqolkiiba) oo ah kuwa rumeysan in odayaasha dhaqanka ay soo xulaan waxa ay sheegeen in odayaasha dhaqanku ay soo saari karaan xildhibaanno kalsooni haysta. Dadka aan waraysannay 15 boqolkiiba waxa ay ku taageereen odayaasha iyaga oo ku sheegay habka ugu fudud ee la isticmaali karo marka la barbar dhigo hababka kale, halka 12 boqolkiiba ay soo jeediyeen in uu yahay hannankani midka ugu kharashka yar.




Inkastoo inta ugu badan dadka xog uruurinta laga sameeyay ay sheegeen odayaasha dhaqanka, ama siyaabo kale oo qabiilka wax kusoo xuli karo in ay yihiin hannaanka ugu wanaagsan oo lagusoo xuli karo xildhibaannada 2016, natiijada cilmibaaristan waxa ay tusineysaa in jawaabaha magaalooyinku ay kala duwanyihiin.

## Farqiga Gobollada

Magaalada Baydhabo 67 boqolkiiba dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa ay taageereen odayaasha dhaqanka ama in waxgaradka beel kasta ay xildhibaannada soo xulaan. Dadkaas, tiro aan yarayn oo ka mid ah (36 boqolkiiba) waxa ay doorbideen in odayaasha dhaqanku ay xildhibaanada soo xulaan, halka 31 boqolkiiba ay taageereen in waxgaradka beel kasta ay xulidda sameeyaan. Waxa xusid mudan, 8 boqolkiiba oo kaliya in ay taageertay in maamul goboleedyada ay xildhibaannada soo xulaan, sidoo kale 8 boqolkiiba waxa ay tilmaameen in ay arkaan in xulidda degmo lagu saleeyo. Haddii doorashada lagu saleeyo degmo, marka la barbar dhigo Garoowe, Kismaayo iyo Muqdisho, Baydhabo waxa ay heleysa metelaad iyo ka

qeybgal yar, taasi ayaana muujineysa taageerada weyn oo ay u hayaan in hoggaanka dhaqanka ama waxgaradka beeluhu ay soo xulaan xildhibaanada.

Dadka ugu badan Garoowe (64 boqolkiiba) ee xog uruurintan ka qeyb galay waxa ay doorbideen in degmooyinka ama maalul goboleedyadu ay soo xulaan xildhibaannada 2016. Tirada ugu badan (37 boqolkiiba) waxa ay taageereen degmooyin in lagu saleeyo. Tiro kale oo muhiim ah (27 boqolkiiba) waxa ay dheheen maamul goboleedyada ha noqdaano aasaaska soo xulidda xildhibaannada, taasi oo macnaheedu yahay tiro aad u badan oo kamid ah Garowe dadkii laga wareystay in ay door bideen hannaan maamul ku saleysan ee aan saami qabiil ahayn. Taasi waxa sii dheer, 20 boqolkiiba waxa ay ku jawaabeen in odayaasha dhaqanka so xulaan xildhibaannada in ay tahay habka ugu fiican, halka 13 boqolkiiba ay taageereen in waxgaradka beel kasta soo xulaan xildhibaannada. Kaliya 3 boqolkiiba ayaa u tixgelisay in muddada loo kordhiyo xildhibaannada uu yahay hannaan fiican. Sida ka muuqata jawaabaha hoose si guud ahaan iyo Garowe si gaar ah, waxa ay tuseysaa in hanaanka awood qeybsi ee 4.5 aan lagu qanacsaneyn. Sidoo kale dadka waxa ay aragti aan fiicneyn ka qabaan dowladda federaalka ah sidaas darted dadka Garowe ma doonayaan in dib loosoo celiyo hanaankii hore oo waxa ay doonayaan mid ka duwan. Sidaas si lamid ah, waxa iyaga saameeyay aragtida maamulka Puntland kaas oo si cad u sheegay in aanu dooneynin in 4.5 awoodda lagu qeybsado islamarkaana uu doonayo in degmo lagu saleeyo. Dadka deggan Puntland waa ay fahamsan yihiin in metelaadda degmooyinka ay ka dhalaneyso in wakiillo badan ay ku yeeshaan baarlamaanka.

Koonfurta Gaalkacyo (Galmudug), 61 boqolkiiba dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa ay sheegeen in odayaasha dhaqanka ama waxgaradka beel kasta in ay soo xulaan xildhibaannada. Inta ugu badan (31 boqolkiiba) waxa ay dheheen odayaasha dhaqanka, halka 29 boqolkiiba ay ku jawaabeen in waxgaradka beel kasta soo xulaan xildhibaannada. Maadaama ay ahayd magaalo qeybsan muddo dheer, odayaasha dhaqanka waxa ay laf dhabar u ahaayeen xasiloonida iyo dib u heshiisiinta magaalada. La yaab ma ahan in dadka deggan magaalada ay rumeysan yihiin in odayaasha dhaqanka ama qabiillada qeybohooda kala duwan ay yihiin hannaanka ugu fiican ee soo saari kara cid matasha shacabka. Dhanka kale, dadka Koofurta Gaalkacyo, 20 boqolkiiba waxa ay taageereen in ay maamul goboleedyadu hormuud ka ahaadaan xulidda xildhibaanada, halka 11 boqolkiiba - tirada ugu badan - ay taageereen muddo kororsi loo sameeyo xildhibaannada hadda jira.

Dadka deggan Kismaayo 56 boqolkiiba waxa ay doorbideen maamul goboleedyada ama degmooyinka in lagu saleeyo doorashada xildhibaannada federaalka. Oo weliba markii la sii kala qaado, 33 boqolkiiba dadka reer Kismaayo waxa ay taageereen in xulidda lagu saleeyo maamul goboleedyada, waana tirda ugu badan ee taageertay maamul goboleedka, marka la eego dhammaan shanta magaalo. Taas waxaa sii dheer, 23 boqolkiiba waxa ay tilmaameen in ay degmooyinku yihiin hannaanka ugu wanaagsan ee lagu soo xuli karo xildhibaannada. Tani waxa ay muujineysaa in dadka Kismaayo ama aanay kalsooni ku


qabin odayaasha dhaqanka ama ay xiiso u qabaan in maamullada gobollada ay qaataan door hogaamineedka doorashooyinka sanadka 2016.

Xaqiiqda ah in Kismaayo ay tahay magaalada qabaa'illada ugu badan degaan hooyna u ah, dabeecad gobol ayaa muuqda in ay tahay mid asaas u ah hannaanka xulasho oo ay rabaan. Waxa sidoo kale suuragal ah in dadka deggan Kismaayo ay cabsi ka qabaan Dowladda Federaalka ah. Waxa loo fasiran karaa in dadka Kismaayo ay walwal ka qabaan in dowladda federaalka ah ay musuqmaasuqi karto habka xulidda sidaas darteed ay u doorbideen hannaan ka fogeynaya soo xulidda magaalada Muqdisho kuna dhaweynaya gobollada. Ku dhawaad afar meelood hal meel (22 boqolkiiba) dadka aan xog uruurinta ka sameynay waxa ay doorbideen odayaasha dhaqanka halka 17 boqolkiiba ay yiraahdeen in waxgaradka beel kasta ay soo xulaan xildhibaannada. Kaliya afar boqolkiiba ayaa arrin loo qaateena u arkay in muddo kororsi loo sameeyo xildhibaannada hadda jira.

Inta ugu badan dadkii xog uruurinta laga sameeyey ee Muqdisho (54 boqlokiiba) waxa ay ku jawaabeen in soo xulidda xildhibaanada ay hormuud ka noqdaan odayaasha dhaqanka (sidaas waxaa qaba 27 boqolkiiba) iyo in waxgaradka beel kasta ay so xulaan xildhibaannada (27 boqolkiiba). Taas cagsigeeda, 29 boqolkiiba waxa ay soo jeediyeen in degmooyin lagu saleeyo xildhibaannada, halka 12 boqolkiiba ay arkaan in maamul goboleed lagu saleeyo. Xaqiiqda ah in ka badan kala bar dadka xog uruurinta ka qeybgalay ee ku sugan caasimadda Muqdisho ay soo jeediyeen odayaasha dhaqanka ama waxgaradka beelaha in ay yihiin hababka ugu habboon ee soo xulitaanka xildhibaannada waxa suuragal ah in ay xariir la leedahay xog ogaalnimadooda doorkii odayaasha dhaqanka qaateen sanadkii 2012. Si kastaba ha ahaatee, ku dhawaad 30 boqolkiiba dadka Muqdisho waxaa kale oo ay doorbideen in metelaadda lagu saleeyo degmooyinka taasi oo muujineysa in dadka deggan Muqdisho ay sidoo kale ku qanacsan yihiin in degmooyin lagu saleeyo xildhibaannada maadaama Muqdisho ay leedahay 17 degmo, tirada degmo ee ugu badan marka la barbar dhigo gobollada kale, sidaasna ay ku heli doonaan xildhibaanno mug leh.

## Muddo Kordhin

Muddo kordhin ma ahayn mid ay doorbidayeen inta badan dadkii aragti uruurinta laga sameeyay. Su'aasha la xariirta muddo kororsiga laba jeer ayaa la weydiiyay. Marka la weydiiyay hannaanka ugu fiican marka lagasoo tago doorasho qof iyo cod ah, boqolkiiba 5 oo kaliya ayaa sheegay in muddo kororsi loo sameeyo xildhibaannada hadda jira. Markii la weydiiyay hay'adaha dowladda keebaa mudan in muddada loo kordhiyo, tiradii ugu badneyd (60 boqolkiiba) waxa ay ku jawaabeen midkoodna (Baarlamaanka ama Xukuumadda) ma mudna muddo kordhin. Kaliya 14 boqolkiiba ayaa soo dhaweysay mudda kordhin in loo sameeyo madaxweynaha iyo xukuumadda. Halka 12 boqolkiiba ay sheegeen in muddo kororsi loo sameeyo xildhibaannada.





Magaalada Garoowe dadkii aan waraysannay 85 boqolkiiba waxa ay sheegeen in ay ka soo horjeedaan in muddo kordhin loo sameeyo dowladda ama baarlamaanka. Magaalada Muqdishana 72 boqolkiiba ayaa sheegay inay ka soo horjeedaan muddo kordhin. Baydhabo iyo Kismaayana 65 boqolkiiba iyo 47 boqolkiiba ayaa sidoo kale kasoo horjeestay muddo kordhon. Laakiin Gaalkacyo, 26 boqolkiiba oo kaliya ayaa tilmaamay in ay ka soo horjeedaan muddo kororsi, halka 39 boqolkiiba ay taageereen in muddada loo kordhiyo madaxweynaha iyo xukuumadda.

Xaqiiqda ah in 47 boqolkiiba oo kaliya ay dadka deggan Kismaayo kasoo horjeedaan muddo kordhin marka la barbar dhigo tirada aadka u badan ee Garoowe oo ah 85 boqolkiiba iyo sidoo kale in inta badan dadka Kismaayo ay doonayaan hannaan ku saleysan gobol si ka duwan Garoowe waxa ay muujineysaa in labada magaalo aanay aragtida ugu mataanaysnayn sida mararka qaar la muujiyo. Aragtida oo goonida ah dadka Kismaayo mar kale waxa ay tusineysaa sida Kismaayo iyo guud ahaan Jubaland ay u tahay meel afkaaro badan yaallaan ama rayigooda u madax bannaan.

Cilmibaaristan waxa ay tusineysaa in muddada oo loo kordhiyo baarlamaanka ama dowladda (madaxweynaha iyo golaha wasiirrada) in aanay ahayn mid ay doonayeen inta badan dadkii aan wareysannay. Qaar badan oo kamid ah xildhibaannada federaalka ah waxa ay doonayaan muddo kordhin, halka beesha caalamka ay kusoo celcelisay in muddo kororsi aanay aqbali doonin. Natiijada cilmibaaristan waxa ay muujineysaa in dareenka inta badan dadkii aan xog uruurinta ka sameynay in ay taagan yihiin halka ay beesha caalamka taagan tahay.

## 4.5 & Soo xulidda Xildhibaannada

Markii aan weydiinnay dadkii cilmibaarista ka qayb qaatay haddii ay ku qanacsan yihiin in hannaanka awood qeybsi ee 4.5 in lagu soo xulo xildhibaannada federaalka ah, 64 boqolkiiba waxa ay sheegeen in ay kasoo horjeedaan. Dhanka kalana, 32 boqolkiiba ayaa sheegay in ay ku qanacsan yihiin 4.5.




Muqdisho ayaa ahayd magaalada tirada ugu badan ee diiddan hannaanka 4.5, oo 81 boqolkiiba ayaa sheegay in ay kasoo horjeedaan habka awood qaybsiga ee 4.5, halka tiro aad u yar – 17 boqolkiiba – ay sheegeen in ay ku qanacsan yihiin. Diidmada dadka deggan Muqdisho ee 4.5 waxa suuragal ah in ay ka dhalatay niyad jab uga yimid natiijada (xildhibaannada iyo dowladda federaalka ah) habkan qabiilka ka dhalatay. Xaqiiqda ah in kabadan 70 boqolkiiba dadka deggan Muqdisho ay kasoo horjeesteen muddo kordhin in loo sameeyo xildhibaannada federaalka ah iyo in tiradaas tiro lamid ah ay sheegeen in waxqabadka dowladda uu yahay mid daciif ah ayaa noqon karta sharraxaad sababta ay u diiddan yihiin 4.5. Si kale haddii loo dhigo, maadaama ay magaalada tahay halka kuraasta dowladda iyo xildhibaannada 4.5 loogu qeybsado, dadka deggan Muqdisho waxa la dhihi kara in ay yihiin daka ugu aqoonta badan awood qeybsiga qabiilka ku saleysan taasi oo sharrixi karta aragtidooda xooggan ee ku aaddan dhaqan gelintiisa iyo sida uusan qabiilku ula jaan-qaadi karin dimuqraadiyadda iyohannaanka dowliga ee casriga.

Magaalada Garowe, 73 boqolkiiba dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa ay sheegeen in aanay ku qanacsaneyn hannaanka 4.5. Sidaas si ka duwan, 20 boqolkiiba ayaa soo jeedisay in ay ku qanacsanyihiin awood qeybsiga ku saleysan 4.5.


Magaalada Kismaayo, 76 boqolkiiba ayaa sheegay in aanay ku qanacsaneyn 4.5; dhanka kalana 22 boqolkiiba oo qura ayaa ka tilmaamay in ay ku qanacsan yihiin 4.5.

Koonfurta Gaalkacyo, 53 boqolkiiba ayaa sheegay in aanay ku qanacsaneyn hannaanka awood qeybsi ee 4.5 in uu noqdo aasaaska soo xulidda xildhibaannada, halka 4 boqolkiiba oo kaliya ay sheegeen in ay aad uga soo horjeedaan. Dhanka kale, 38 boqolkiiba dadka cilmibaarista ka qaybqaatay ayaa soo jeediyay in ay aad ugu qanacsan yihiin, ama ay ku qanacsan yihiin hannaanka 4.5.

Waxa xusid mudan in magaalada Baydhabo ay tahay magaalada kaliya ee inta badan dadka aan ka wareysannay ay taageereen 4.5. Tiro aad u badan oo ah 71 boqolkiiba, ayaa sheegtay in ay ku qanacsan yihiin awood qeybsiga xildhibaannada in lagu saleeyo 4.5. 71boqolkiiba waxa ay isugu jireen, in ka badan kala bar (51 boqolkiiba) oo sheegay in ay ku qanacsan yihiin, iyo 20 boqolkiiba tilmaamay in ay aad ugu qanacsan yihiin. Dhanka kale, 26 boqolkiiba ayaa ku jawaabey in aanay ku qanacsaneyn habka awood qeybsiga ee 4.5.

## Waxqabadka Dowladda

Dadka daraasadda ka qayb qaatay markii aan weydiinney qiimeyntooda waxqabadka dowladda federaalka ah, tirada ugu badan (62 boqolkiiba) waxa ay sheegeen in ay rumeysan yihiin in uu waxqabadka dowladda yahay mid daciif ah ama mid fashil ah. Oo dadkaas, 37 boqolkiiba ayaa ku qiimeeyay waxqabadka dowladda mid daciif ah, halka afar meelood meel (25 boqolkiiba) ay ku qiimeeyeen mid fashil ah. Dhanka kale, 23 boqolkiiba dadka aan xog uruurinta ka sameynay waxa ay ku qiimeeyeen dowladda waxqabadkeeda mid wanaagsan halka 11 boqolkiiba ay dheheen dowladda aad ayay u waxqabad fiicneyd, taas oo ka dhigeysa 34 boqolkiiba dadka ku qanacsan waxqabadka dowladda federaalka ah.



Magaalada Garowe, 78 boqolkiiba dadka aan xog uruurinta ka sameynay waxa ay caddeeyeen in waxqabadka dowladdu yahay mid daciif ah ama mid fashil ah. 35 boqolkiiba ayaa yiri waxqabadka dowladdu waa mid liita halka 43 boqolkiiba ay tilmaameen in ay waxqabadka dowladda u arkaan mid fashil ah. Sidaas cagsigeeda, 15 boqolkiiba waxa ay qabeen in dowladda waxqabadkeeda uu wanaagsanaa halka 4 boqolkiiba oo kaliya ay ku qiimeeyeen waxqaadka dowladda mid aad u wanaagsan.

Magaalada Muqdisho, 73 boqolkiiba dadka noo jawaabey waxa ay ku qiimeeyeen waxqabadka dowladda mid daciif ama fashil ah. Taasoo marka hoos loogu sii dego, 44 boqolkiiba ay ku sheegeen waxqabadka dowladda mid daciif ah, halka 29 boqolkiiba ay dowladda waxqabadkeeda ku tilmaameen in uu yahay mid fashil ah. Dhanka kale, 22 boqolkiiba dadka aan Muqdisho ka waraysannay waxa ay tilmaameen waxqabadka dowladda in uu yahay mid wanaagsan halka 4 boqolkiba ay sheegeen in waxqabadka dowladdu uu yahay mid aad u fiican.

Waxaa xusid mudan in aragtida dadka deggan Muqdisho iyo kuwa Garoowe ay aad isugu dhaw yihiin. Waxa laga yaabaa in dadka qaar ay u maleeyaan in fikradaha magaalada Garoowe (oo lagu sheegi karo magaalo inta badan Dowladda Federaalka ah la leh xariir aan wanaagsaneyn) in ay ka duwanaan doonto dareenka Muqdisho oo ah magaalo ay Dowladda Fderaalka ah ku shaqeyso. Waxaasa arrin ishu qabanayso ah in labada magaalaba ee Muqdisho iyo Garoowe in 4 boqolkiiba oo kaliya ay u arkeen waxqabadka dowladda mid aad u fiican, halka in ka badan 70 boqolkiiba ay ku qiimeeyeen waxqabadka dowladda mid hooseeya.

Magaalada Kismaayo, 66 boqolkiiba waxa ay ku jawaabeen in waxqabadka dowladda uu yahay mid fashil ah ama mid liita ah. Oo 38 boqolkiiba ayaa waxqabadka dowladda ku sheegay mid liita, halka 28 boqolkiiba ay dowladda ku qiimeeyeen mid fashilantay. Dhanka kale, 26 boqolkiiba waxa ay sheegeen in ay waxqabadka dowladda uu wanaagsan yahay, halka boqolkiiba 5 ay ku qiimeeyeen waxqabadka dowladda mid aad u fiican. Taasi oo ka dhigan ku dhawaad seddex meelood oo meel, dadka Kismaayo waxa ay ku qanacsan yihiin waxqabadka dowladda.

Magaalada Baydhabo 63 boqolkiiba waxa ay ku qiimeeyeen waxqabadka dowladda mid daciif ama mid fashil ah. Oo dadkaas tiro aad u badan, 47 boqolkiiba, ay ku qiimeeyeen dowladda mid daciif ah halka 16 boqolkiiba ay ku qiimeeyeen mid fashil ah. Kuwa ku qanacsan waxqabadka dowladda, ku dhawaad afar meelood meel 24 boqolkiiba waxa ay waxqabadka dowladda ku sheegeen mid fiican, halka 7 boqolkiiba ay yiraahdeen waxqabadka dowladda waa mid aad u fiican, taasi oo ka dhigeysa dadka ku qanacsan waxqbadka dowladda 31 boqolkiiba. Tani waxa ay muujineysaa sida dadka Baydhabo ay u arkaan waxqabadka dowladda uu ugu dhaw yahay sida ay u arkaan dadka Kismaayo, laakiin qiimayntu waxa ay noqonayaan is-fasiraysa marka ay dadku ka jawaabaan sababta ay ugu maleynayaan in uu waxqabadka dowladda u hooseeyo.


Dhanka kalase, magaalada Gaalkacyo 70 boqolkiiba waxa ay tilmaameen in waxqabadka dowladda uu yahay mid wanaagsan ama mid aad u fiican. 28

boqolkiiba waxa ay ku jawaabeen in waxqabadka dowaladda uu yahay mid fiican, halka 42 boqolkiiba – taas oo ah tirada ugu badan – ay ku qiimeeyeen dowladda mid waxqabadkeeda aad u fiican yahay. Dhanka kale, 26 boqolkiiba oo kaliya ayaa sheegay in waxqabadka dowladdu uu yahay mid daciif ah iyada oo tiro intaas kasii yar 10 boqolkiiba ay ku qiimeeyeen dowladda mid fashil ah.

Waxaa mudan in la xuso in koonfurta Gaalkacyo ay tahay meesha kaliya oo ay dadka deggan sheegeen in ay ku qanacsan yihiin waxqabadka dowladda halkaas oo sidoo kale dadka daraasadda ka qayb qaatay in mug leh oo ka mid ah ay oggolaayeen in muddada loo kordhiyo xildhibaannada iyo dowladda. Koofurta Gaalkacyo waxa ay sidoo kale tahay magaalada labaad ee ugu badan oo soo jeediyay in odayaasha dhaqanku ay xildhibaanada soo xulaan. Gaalkacyo waa magaalo muhiim u ah maamul goboleedka dhawaan la dhisay ee Galmudug, kaas oo ay dowladda federaalka ah taageerto islamarkaana uu hoggaamiyo saaxiib aad ugu dhaw madaxweynaha Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya. Maamullada kale sida Puntland waxa ay ku doodaan in Galmudug aanay maamulin labada gobol ee uu dastuurku sheegayo in ay yeeshaan maamul goboleedyada. Dadka waxa ay is dhihi karaan aragtida wanaagsan ee dadka koonfurta Gaalkacyo ka qabaan dowladda federaalka ah in ay la xariirto sida dowladda u taageertay sameysanka maamulka Galmudug iyo sidoo kale xariirka siyaasad ee aadka u dhaw ee u dhexeeya madaxweynayaasha Dowladda Federalaka iyo Galmudug.

## Waxyaabaha sababay waxqabadka hooseeya

Markii la weydiiyay waxyaabaha saameynta ku yeeshay waxqabadka ama waxqabad la'aanta dowladda, 74 boqolkiiba waxa ay ku jawaabeen musuqmaasuq iyo karti la'aan. 52 boqolkiiba ayaa ku jawaabtay musuqmaasuq in uu yahay midka ugu weyn ee saameeyay waxqabadka dowladda, halka 22 boqolkiiba ay sheegeen in karti la'aan ay tahay arrinta waxqabadka dowladda ragaadisay. Dhanka kale, 15 boqolkiiba dadka daraasadda laga sameeyey waxa ay sheegeen in rabitaan la'aan in wax la qabto ay tahay midda saameynta ku yeelatay waxqabadka dowladda. Boqolkiiba 11 oo kaliya ayaa magacaabay tabar iyo aqoon la'aan in ay waxqabadka dowladda dib u dhigtay.




Magaalada Muqdisho, tirada ugu badan (64 boqolkiiba) waxa ay ka dhawaajiyeen in musuqmaasuqa uu yahay midka ugu weyn ee saameeyay waxqabadka dowladda; 14 boqolkiiba ayaa sidoo kale ka dhawaajiyay karti la'aan. 13 boqolkiiba waxa ay farta ku fiiqeen tabar iyo aqoon la'aan, iyadoo tiro yar (9 boqolkiiba) ay tilmaameen rabitaan la'aan in wax la qabto in ay saameysay waxqabadka dowladda.

Magaalada Garowe, 53 boqolkiiba waxa uu ku eedeeyeen dowladda musuqmaasuq; 22 boqolkiiba waxqabad la'aanta waxa ay u tiiriyeen karti la'aan; 15 boqolkiiba waxa ay tilmaameen rabitaan la'aan in wax la qabto ayaa saameyn ku yeelatay waxqabadka dowladda. 9 boqolkiiba dadka noo jawaabay waxa ay sheegeen tabar iyo aqoon la'aan ay tahay arrinta saameysay waxqabadka dowladda.

Magaalada Baydhabo 49 boqolkiiba dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa ay sheegeen musuqmaasuq in uu yahay midka ugu weyn ee saameynta ku yeeshay waxqabadka dowladda; 20 boqolkiiba waxa ay ku sheegeen karti la'aan; 18 boqolkiiba waxa ay u tiiriyeen tabar iyo aqoon la'aan. 13 boqolkiiba ayaa sidoo kale sheegay rabitaan la'aan in wax la qabto.

Magaalada Gaalkacyo, kuwa ku jawaabay dowladda waxqabadkeeda wuu hooseeyaa, 45 boqolkiiba waxa ay ka dhawaajiyen musuqmaasuq in uu yahay sababta ugu weyn. 36 boqolkiiba waxa ay ku jawaabeen karti la'aan; 10 boqolkiiba ayaa iyagana sheegay rabitaan la'aan in wax la qabto, halka tiradaas tiro lamid ah oo ah 10 boqolkiiba ay sheegeen in waxqabadka dowladda ay saameysay tabar iyo aqoon la'aan.

Magaalada Kismaayo, 44 boqolkiiba ayaa ku jawaabay musuqmaasuq in uu yahay sababta ugu weyn oo ay ku guul dareysatay dowladdu. 22 boqolkiiba waxa ay soo jeediyeen karti la'aan iyada oo 22 boqolkiiba ay ka dhawaajiyeen rabitaan la'aan in wax la qabto. 13 boqolkiiba ayaa sidoo kale sheegay in tabar iyo aqoon la'aan ay tahay arrinta ugu weyn ee waxqabadka dowladda saameynta ku yeeshay.


Kuwa ku jawaabay in waxqabadka dowladda uu hooseeyo, in ka badan 70 boqolkiiba magaalo kasta waxa ay sheegeen musuqmaasuq, karti la'aan, rabitaan la'aan in wax la qabto waxyaabaha ugu weyn ee

sababay in waxqabadka dowladda hooseeyo. Marka dad xog uruurin laga sameeyay ay sheegaan in dowladda ay musuqmaasuq badan tahay, ama karti la'aan iyo rabitaan la'aan ay horjoogsadeen in la qabto wixii dowladda looga fadhiyey in ay ka shaqeyso (doorashooyin iyo waxyaabaha la xariira), waxa ay dadka masuuliyadda guuldarrada saarayaan dowladda. Markase ay tabar iyo aqoon la'aan u tiiriyaan waxqabad la'aanta dowladda, markaasna waxaa muuqanaysa in ay farta ku fiiqayaan maal, muruq iyo aqoon la'aan dowladda haysta.

## Doorka beesha caalamka

Doorka iyo gacansiinta beesha caalamku waxa ay ahayd mid aad u muuqata dhowr iyo labaatankii sano ee lasoo dhaafay. Qaramada Midoobay iyo deeq bixiyayaasha reer galbeedka waxa ay muhiim u ahaayeen dhameystirkii 12 sano oo dowlado kumeel gaar ah dalka ka talinayeen; waxa ay maalgeliyeen qoraalka dastuurka cusub ee Soomaaliya. Beesha caalamka waxa ay hadda taageeraan dowladda federaalka ah waxayna sidoo kale gacan siiyaan ciidanka nabad ilaaliyayaasha ka socda Midowga Afrika ee la dagaallama Al shabaab. Deeq bixiyayaasha waxa ay taageero maaliyad ah ku bixinayaan Madasha Wadatashiga Qaran. Si kastaba ha ahaatee, aragtida dadka xog uruurinta laga sameeyay ee ku aaddan beesha caalamka ma ahan mid u wanaagsan sida deeq bixiyayaasha ay jeclaan lahaayeen in loo arko.

Ka qeybgalayaasha cilmibaaristan waxa la weydiiyay sida ay u arkaan in beesha caalamku ay qabatay wixii looga baahnaa in ay qabtaan si doorasho uga dhacdo Soomaaliya 2016. Tiro aad u badan, 67 boqolkiiba ayaa ku jawaabay in beesha caalamku ku guul darreysatay ama ka wax yar ka qabatay si Soomaaliya ay uga dhacyo doorasho dimoqraadi ah. Tiro muhiim ah, 40 boqolkiiba ee katirsan dadka xog uruurinta laga sameeyay, waxa ay sheegeen in beesha caalamku ay qabatay wax yar. 26 boqolkiiba waxa ay sheegeen in beesha caalamku ku guuldarreysatay Soomaaliya. Dhanka kale, 28 boqolkiiba waxa ay soo jeediyeen in beesha caalamku qabatay wixii ay qaban kartay si doorasho uga dhacdo Soomaaliya.



Marka la weydiiyay saameynta beesha caalamku ay ku yeelan karaan hannaanka doorasho oo ay Soomaaliya qaadan doonto, tiro aad u badan (73 boqolkiiba) ayaa sheegay in ay tahay saameyntooda mid weyn ama mid aad u weyn. Ku dhawaad kala bar (48 boqolkiiba) waxa ay sheegeen in beesha caalamku leeyihiin saameyn aad u weyn. Afar meelood meel (25 boqolkiiba) waxa ay sheegeen in saameynta beesha caalamku ay weyn tahay.

Inkasta oo ku qanacsanaanta dadka ee doorka beesha caalamka ee ku aaddan doorashooyin dimoqraadi ah ee Soomaaliya ka dhaca ay tahay mid hooseysa, dadka xog uruurintan laga sameeyay waxa ay rumeysan yihiin in beesha caalamka saameyn weyn ku yeelan doonaan hannaanka xulasho oo ay Soomaaliya qaadan doonto sanadka 2016. Kaliya 19 boqolkiiba ayaa sheegtay in saameynta beesha caalamku aanay weyneyn.

## Gunaanad

Cilmibaaristan waxa ay muujineysaa in muwaadiniinta aragtida laga soo uruuriyay ee ku kala nool ilaa shan magaalo ay fikrado xooggan islamarkaana kala duwan ka qabaan hababka soo xulista xildhibaannada 2016. Cilmibaaristan waxa ay muujineysaa in ay jirto ku qanacsanaan la’aan baahsan ee laga qabo 4.5 marka laga reebo Koonfur Galbeed. Inta badan dadkan aan xog uruurinta ka sameynay waxa ay sidoo kale sheegeen in aanay ku qanacsaneyn waxqabadka dowladda. Tiro aad u badan ayaa sidoo kale kasoo horjeesatay in muddada loo kordhiyo xildhibaannada baarlamaanka hadda jira. Inta badan dadka inoo jawaabay waxa ay sidoo kale muujiyeen shaki ay ka qabaan saameynta beesha caalamku ku leedahay arrimaha doorashooyinka.

72 boqolkiiba dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa ay muujiyeen in ay doonayaan soo xulid ka duwan odayaasha dhaqanka. Tani waxa ay muujineysaa in dadka Soomaaliyeed ay doonayaan hab xulitaan lagu kalsoonaan karo kana fiican kii hore oo ay odayaal dhaqameed kaligood soo xulayeen xildhibaannada.  In kasta oo carrabka lagu adkeeyey in hannaankii hore mid ka hufan ay dadku doonayaan, haddana afarta qaab oo xulista ah ee miiska saaran, dadka aan waraysannay waxaa muuqata in ay inta badan odayaal dhaqameed iyo xeer-beegtida beelaha ka door bidayaan in hanaan ku salaysan degmooyin iyo gobolo xildhibaanada lagu soo xulo. Taas oo muujinaysa, dalabka ay siyaasiyiinta gobolada ee aan la dooran ay dalbayaan in hannaan ay iyagu hagayaan lagu badalo habka beelaha ee xulista aanay ku qotomin dumuqraadiyayn balse ay tahay oo kaliya balaarin ay iyagu saamayntooda fidsanayaan.

## Talooyin Tixgelin Mudan

1) Dadka Soomaaliyeed waxa loo ballan qaaday doorasho qof iyo cod ah, ballanqaad aanan suuragal ahayn marka la sameynayay haddana laga soo dhalaali waayay. Sidaa darteed, haddii aanay doorasho dheceynin, dadka Soomaaliyeed waa in si dhab ah loola tashadaa. Si ka duwan wadatashiyada siyaasadeed, xog uruurintan waxa ay eegtay aragtida muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo waxa ay doonayaan sanadka 2016. Waxa jira maahmaah Soomaaliyeed oo oraneysa, Meyd iyo Martibaa la maamulaa. Soomaalida ma dhimanin waddankoodana marti kama ahan, codkooda waa in la maqlaa.

2) Hannaanka soo xulidda xildhibaannada waa in aanu noqonin mid ay kooxo dabaqadda sare ah afduubtaan iyo arrin siyaasiyiinta dowladda federaalka ah iyo hoggaamiyayaasha maamul goboleedyada ay wax ku kala goostaan. Waa in uu noqdaa mid loo dhan yahay kuna saleysan waxa u wanaagsan Soomaaliya iyo Soomaalida hadda iyo mustaqbalka.

3) Habka doorasho ee 2016 la qaadanayo waa in loo qaabeeyaa qaab ku hagaya Soomaaliya in doorasho xor ah oo xalaal ah ka dhacdo sanadka 2020. Tani waa in ay noqotaa hadafka udub dhaxaadka u ah hanaanka xulista hadda, haddii kale Soomaaliya waxa ay lahaan doontaa dowlado kumeelgaar ah oo joogto ah iyo siyaasiyiin aan la dooran, taasi oo sii wadi doonta isbeddel la’aanta.

4) Odayaasha dhaqanka waxa ay door ku leeyihiin nabadeynta iyo dowlad dhisidda Soomaaliya. Doorkooda waa in aan la docwareemin. Muwaadiniin badan ayaa u arka odayaasha beelaha hoggaan sharci/xalaal ah. Odayaasha waxa ay tiir muhiim ah u ahaayeen nabadda Puntland iyo Somaliland, sidoo kale waxa ay nabadda u ahaayeen hormuud heerka qaran. Odayaasha waxa ay soo xuleen xildhibaannaddii baarlamaanka Soomaaliya ee sanadkii 2000 (Carta Djibouti), sanadkii 2004 (Mbaghati, Kenya), sanadkii 2009 (Djibouti) iyo sanadkii 2012 (Muqdisho). Odayaasha waa in aan laga saarin hannaanka soo xulidda. Dabcan shacabka xogta laga soo uruuriyay waxa ay sheegeen in aanay dooneyn in lasoo celiyo isla nidaamkii 2012. Inta laga gaarayo doorasho qof iyo cod ah, xog uruurintan waxa ay muujineysaa in muwaadiniinta ay door bidayaan in qaab qabiilka ku saleysan – odayaasha iyo waxgaradka beelaha (constituent assembly) – in ay soo saari karaan baarlamaan sharci ah, kalsooni lagu qabo loona dhan yahay.

Si aan looga tagin rabitaanka qeyb muhiim ah ee katirsan muwaadiniinta ee doonaya hannaan ku saleysan maamul - degmo ama gobol - xildhibaannada maamul goboleedyada waxa loo xilsaari karaa – meeshii suurto gal ah, in ay dowr ama kaalin ku yeeshaan soo xulista wakiillada (senators) 54-ta ah u ee gobolada ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka – kaas oo Dastuurku qabo in la sameeyo ayna tahay in xubnaha Aqalka sare ay ka yimaadaan maamullada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya. Aqalka Sare waxa looga baahan yahay in ay ka qeyb galaan doorashada qaran ee madaxweynaha iyo sameynta Maxkamadda Dastuurka - iyo hay'ado iyo guddiyo kale ee aad muhiim u ah.

5) Musuqmaasuqa waa dhibaatada ugu weyn ee Soomaaliya dib u dhigeysa oo burburineysana hannaanka dimoqraadiyaynta iyo in la helo hoggaan lala xisaabtami karo. Musuqmaasuqa waxa kamid ah in cod la gato, in odayaasha la laaluusho iyo in la abuuro dhaqan baahsan ee aan la gabbad lahayn oo ay lacagtu go'aamiso cidda hoggaanka noqoneysa. Hannaanka soo xulidda xildhibaannada 2016 waa in loo qaabeeyaa qaab joojinaya hab dhaqankan. Baarlamaanka waa in uu meel mariyaa shuruuc ciqaabeysa qofka musuqmaasuq ku kaca. Waa in la abuuraa, hab fur-cad laguna hubin karo xakamaynta musuq-maasuqa. Bulshada rayidka ah iyo beesha caalamkuba waa in ay door ka qaataan la dagaallanka musuqmaasuqa.

6) Abuuritaanka iyo soo ifbaxa xisbiyada siyaasadeed waa in la dhiirrigeliyaa. Hay'adaha iman doono kaddib Sebtember 2016, waa in ay door muuqda siiyaan barnaamijyada iyo fikradaha siyaasadeed intii la sii dhiiri gelin lahaa barnaamijka qabiilka ee 4.5 ee ma dhalayska ah ama guray. Qaabka dowliga ah e 2016 loo ruqaansado, waa in uu dalka ku hogaamiyaa doorasho xor ah oo ay dhacda sanadka 2020. Sidaas darteedna, in fursad la siiyo xisbiyada siyaasadeed ee curdanka ah, waa arrin qeyb ka noqonaysa dimoqraadiyeynta.

7) Beesha caalamka waxa ay saameyn weyn ku leedahay siyaasadda Soomaaliya taas oo ah xaqiiq dadkii aan xog uruurinta ka sameynay ay ka war qabaan aysanna u riyaaqsanayn. Beesha caalamku waa in ay isticmaashaa wixii tabar iyo saamayn ay leedahay in Soomaaiya ay qaadato hannan xulasho oo hufan xalaalna ah; waaana in beesha caalamka Soomaalida ku caawiso xakamaynta buruburka baahsan ee musuqmaasuqa iyo cod iibsashada uu ku leeyahay hay'adaha dowliga ah.

The Heritage Institute
For Policy Studies